

Daryeelka ilmaha iyo

Caafimaadka ilmaha

XAASHIDA MACLUUMAADKA WAALIDKA



Daryeel wax-ku-oolla oo la siinayo Dhallaanka

Daryeellayaashu door muhiim ah ayey ka qaataan koritaanka carruurta. Daraasa ayaa muujisay in dhallaanka iyo gurboodkuba ka faaiidaystaan daryeelka wax ka qabanaya baahidooda asaasiga ah ee cilaqaadka daryeelida dhow, ee caafimaadka iyo amaanka, ku xirnaanta qoyska iyo dhaqanka, markay bixinayaan adeega daryeelbixiyayaal wax-ku-oolla oo aqoon leh.

Cilmi baaris ayaa muujisay in carruurta yaryari yihiin kuwa khatarta u sahlan si sahlaya wax u baran kara. Waxay ku xiran yihiin dadka waaweyn xagga: badbaadida jireed; kaalmada shucuureed iyo amaanka; siinta meel amaana oo ay wax ku bartaan; sixida, toosinta, iyo la socodka dabecada bulshada; iyo is-dhaafsigu macluumaadka wixii ku saabsan sida adduunku u shaqeeyo iyo shuruucda nololaha. Sidaas oo ay tahay dhallaanka yaryar iyo carruurta korran ayaa ah kuwa xirfad siyaada leh isma markaana ah: curiyayaal; bilaabayaasha hadal is-dhaafsigu; iska-dhigayaal, turjubaano; xoojiyayaal; raadiyayaalka macnaha, dhisayaasha cilaqaadka; waana kuwa doonaya inay wax ogaadaan, is diraya, oo iyagu wax isbaraya. Daryeellayaasha sida fiican wax ugu biiriya ilmaha koritaankiisa waa sahlayaasha jecel shucuurta, wax-kororsiga, luqada, jirka iyo ka muuqashada bulshada. Ilmaha, wax fiican barta iyo lehna daryeel fiican oo kaalmaynaya shucuurta iyo tas-hiilaadka barashada iyo koritaanka isku mar ayey dhacayaan. Arrintaan 'wax-ku-ool' ah waxaa looga jeedaa in lagu maamulo waxna lagaga qabto baahida ilmaha laguna gudbiyo ilmaha fekerkiisa iyo dareenkiisa.

- Daryeelka wax-ku-oolka ah macnihiisu waa raadinta calaamada ama astaanta iyo la qabsashada. Carruurta yaryari waxay leeyihiin rabitaan ay ku dhasheen oo ay wax ku bartaan kuna sahmiyaan; si joogto ah ayayna wax u raadiyaan, u baranayaan waxay arkeen, maqleen, dareemeen, dhadhamiyeen oo taabteen, badanaa isku mar. Runtii, nololaha waxay ula qabsadaan si guud markay xilligaan ku jiraan marka loo fiiriyo xilliyada kale; ilmuhuna ma kala saaro barashada shucuurta, bulshanimada, garaadka, luqada midka jireed. Daryeelluhu waa in uu ogolaadaa in ilmaha ay hagto waxa uu xiisaynayaa. Waa in uu fahmaa waalidku sida loo akhriyo loogana jawaabo dabecada ilmaha yar kuna faraxsanaadaa noocyada barashada oo ilmuhu ku mashquulsan yahay.
- Daryeelka wax-oolka ahi wuxuu u baahan doonaa ixtiraamida ilmaha yar. Ixtiraamida waxaan uga jeednaa qadarinta waxa carruurta samaynayso, markay samaynaayan. Taas macneheedu waxa weeye in ilmuhu wuxuu xiisaynayo aan laga horumarin kan daryeellaha, iyo laga fogaado lahwiga si loo baro ilmaha duruu muayina.
- Daryeel wax-ku-oolla ayaa loo baahan yahay awood weyn iyo la socod. Daryeellaha taxadarini wuxuu la socdaa waxa ilmuhu isku deyeyo inuu iqtiraaxo. Iyagoo la soconaya habka iqtiraaxida, daryeelbixiyayaashu waxay ogaadaan sida ugu fiican oo loola xiriirin karo cayaartooda.
- Daryeelka wax-ku-oolka ahi waa tartiib u samayn. Daryeellaha taxadarini wuxuu u ogolaadaa in ilmuhu samaysto barasho awoodiisa la jaanqaadi karta. Daryeellaha taxadarini wuxuu raaca ilmaha, kulamana degdego tusaalayn iyo kaalmayn, waana in laga hortagaa wax kasta oo wax u dhimi kara barashada.
- Daryeel wax-ku-ool ahi waa qadarinta dhaqanka. Daryeelka qadariya dhaqanka, wuxuu wax u sameeya si waafaqsan sida guriga wax looga sameeyo. Ilmuhu wuxuu la kulmaa xaallad la mid ah tan guriga, wuxuuna dareemaa xiriirka u dhexeeya guriga iyo goobta daryeelka ilmaha, sidaas darteedna wuxuu dareemaa amaan.

Xaashida xaqiiqda ee waalidka waxaa la hellaa iyadoo dhowr luqadood ku qoran waxaana lagala soo bixi karaa websaytka Isku-xirka Ilmanimada-Hore (Early Childhood Connections) oo ah www.ecconnections.com.au

DA'DAALKA



ROYAL CHILDREN'S HOSPITAL

WAXAA TAAGEERAY DEEQDA
WAXBARASHADA KA TIMID



WAXAA KAALMEEYAY GOLAHA
AQOONSIGA DARYEELKA
ILMAHA EE QARANKA



WAXAA TAAGEERAY



Australian Government
Department of Families,
Community Services and
Indigenous Affairs